


Barashada Goobta shaqada Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Workplace Learning Information for Parents and Carers



Doorka xannaaneenayaasha iyo waalidiinta wuxuu muhiim u yahay guusha barnaamijka barashada goobta shaqada. Taageero ku bixinta guriga, waxaad ka caawin kartaa ilmahaaga inuu sameeyo go'aamo muhiim ah oo ku saabsan mustaqbalkooda oo ay ka helaan inta ugu badan khibradooda goobta shaqada.

Workplace Learning (Barashada Goobta shaqada)

Barnaamijyada barashada goobta shaqada waxay qayb ka yihiin manhajka dugsiga sare ee NSW. Waxay u suurto geliyaan ardeyda inay ku qaadaan wakhtiga xiisad la qorsheeyey goobta shaqada gudaheeda. Khibradaani waxay kor u qaadeysaa waxbarashada fasalkooda, waxay caawinaysaa doorashooyinkooda shaqo oo ay dhistaa xirfadahooda mihnadeed. Waxa lacag bixin ah oo ku lug leh majiraan.

Faa'iidooyinka barashada goobta shaqada

Barashada goobta shaqada waxay caawineysaa ardeydu inay:

- Dhisaan xirfadahooda shaqo ee guud sida shaqo kooxeedka iyo isgaarsiinta goobta shaqada
- Yeeshaan xirfado mihnadeed khaas ah, oo la xiriira Vocational Education and Training (Tababarka iyo Waxbarashada Mihnadda) (VET)
- Sameeyaan go'aamo ay ka warqabaan markay qorsheynayaan maadooyinka dugsiga iyo jahadooda shaqo dugsiga ka dib.

Barnaamijyada barashada goobta shaqada

Khibrad shaqo waxaa badanaa sameeya ardeyda Years 9 ama 10 oo leh fursado Years 11 iyo 12. Waxay siisaa horudhac guud oo ku saabsan 'shaqada aduunka' iyo laba mihnadood oo suurto gal ah. Ardeyda waxay sameeyaan shaqooyin la kormeerayo oo ku haboon heerkooda xirfadeed.

Barnaamijka shaqo ku meelaynta waxaa loogu talagalay ardeyda ka diiwaangashan Higher School Certificate (Shahaadada Dugsiga Sare) (HSC) koorsooyinka mihnadu aqoonsan tahay. Wakhtiga la meelaynayo, ardeydu way ku celceliyaan waxay doonayaan inay bartaan inay gaaraan heerarka mihnada. Shaqo ku meelaynta waa shuruud ku ah HSC koorsooyinka qaabka manhajka mihnad gaar ah. Dugsigu wuxuu sameyn doonaa shaqo ku meelayn Work Placement Service Provider.

Qorsheynta safarka

Meelaynta badideedu waxay noqonaysaa fogaal aad gaadiidka dadweynaha uga raaci karto.

Dhammaan safarku waa kharash ardeygu iska bixinayo. Waxaa lagaa filayaa inaad ka caawiso ilmahaaga qorshaha safarkooda oo aad taageerto kharashka safarkooda inta meelayntani socoto.

Haddii ay jiraan waxaad saluugto, waa inaad kala hadashaa ilmahaaga iyo qofka qabanqaabinaya barnaamijka.

Ogsoonow: Haddii ilmahaagu uu ka fekerayo shaqo ku meelaynta guriga ka fog ama midda gobolada kale, waa inaad marka hore la soo xiriirtaa dugsiga ilmahaaga. Dukumiinti dheeraad ah waa in la buuxiyaa ka hor intuuusan ogolaan ku haboonaanta meelaynta Maamulaha dugsiga.

Xaaladaha degdega ah iyo ammaanka ardeyga

Ilaalinta ilmaha iyo ammaanka ardeyga ayaa u leh mudnaanta koowaad NSW Department of Education.

Loo shaqeeyayaasha martida loo yahay waa inay soo wargeliyaan dugsiga isla markiiba wixii shilal ammaan iyo caafimaad ah, oo ay ku jiraan sigashada, intay ardeydu ku jiraan meelaynta shaqo. Loo shaqeeyayaasha martida loo yahay waa inay sidoo kale wargeliyaan ururka bulshada ama gaarka ah ama TAFE haddii ay bixiyaan koorsada. Waxqabadka qaarkii dhammaantii waa reeban yahay, halka kuwe kale ay leeyihiin shuruudo ku lufaaqan. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan gal: <https://education.nsw.gov.au/teaching-and-learning/curriculum/career-learning-and-vet/workplace-learning/keeping-students-safe>

Ilmahaagu wuxuu qaadan doonaa Student Contact Card (Kaarka Xiriirka Ardeyga) oo qoraya lambarka medicare koda (ama taleefanka dhakhtarkooda) iyo xiriiradooda saacadaha shaqada inta lagu jiro iyo marka laga baxaba. Macluumaadkan waa muhiim lacala haddii ay dhacdo xaalad degdeg ahi.

Ardeydu waa inay isla markiiba u soo sheegaan wixii ay ka saluugaan ammaanka, khatarta ama shilal loo shaqeeyaha, dugsiga, TAFE ama ururka tababarka diiwaangashan ee bulshada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah, laakiinse waa inay noqotaa 24 saac gudahood. Haddii ilmahaagu uu qabo wuxuu saluugsan yahay, uu dhaawacmo ama uu khatar dareemo oo uusan awoodin inuu u sheego arintan loo shaqeeyaha uu martida u yahay, waa inay wacaan dugsiga ama xiriirka degdega ah isla markiiba.

Ilaalinta iyo caymiska

Wasaaraddu waxay u sameysay ceymis ardeyda ku dhaawacma intay ka qaybgelayaan goob shaqo barasho oo la ogolaaday. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg Workplace Learning Guide for Parents and Carers xiriirka hoose:

<https://education.nsw.gov.au/teaching-and-learning/curriculum/career-learning-and-vet/workplace-learning/guides-and-forms>

Ardeyda qaba xaaladda caafimaad ama iin

Waxaad u baahan doontaa inaad u soo sheegto dugsiga, TAFE ama ururka tababarka diiwaangashan ee bulshada ee iin kasta, waxbarashada iyo baahida taageerada, xaalada caafimaadka (tusaale oo lagu wiisateeyey khatarta anaphylaxis) ama xannibaad saameynaysa ilmahaaga ee laga yaabo inay saameynayso ammaanka, fiyoobaanta iyo ku kormeerka ilmahaaga goobta shaqada.

Qorshayaasha daryeelka caafimaadka waxaa laga yaabaa in loo diyaariyo loo shaqeeyaha martida loo yahay. Haddii aadan hubin, la hadal Dhakhtarka Guud ee ilmahaaga.

Haddii ilmahaagu uu u baahan yahay in wax looga bedelo goobta shaqada si ay fuliso baahidooda taageero, kala hadal dugsiga oo uu la socdo TAFE ama ururka tababarka diiwaangashan ee bulshada inta lagu jiro nidaamka qorsheynta. Macluumaadkan waa in lagu daraa ilmahaaga Student Placement Record (Diiwaanka Ku meelaynta Ardeyga).

Wixii macluumaad dheeraad ah

1. La xiriir dugsiga ilmahaaga maadaama ay u sameeyeen barnaamijka waxbarasho ilmahaaga.
2. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Sarkaalka Saree e Pathways ee ka masuulka ah waxbarashada goobta shaqada ee xafiiska xaafadda ee Wasaaradda. Faahfaahinta xiriirka waxaa laga heli karaa dugsiga.
3. Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450.

Senior Pathways, Pathways and Transitions
NSW Department of Education
seniorpathways@det.nsw.edu.au